Oregon Health Authority



Cudurka Meningococcal

Waxa ay kulliyadaha bulshadu u baahan yihiin in ay ogaadaan

Q. Waa maxay cudurka meningococcal?

A. Cudurka meningococcal waa mid marar dhif ah dhaca, oo laga yaabo in yahay xanuun nafta halis gelinaya oo ay sababto bakteeriyada *Neisseria meningitidis.* Cudurku wuxuu dhacaa marka bakteeriyadu gasho jirka, iyadoo keenta infekshan ku dhaca dareeraha ku wareegsan maskaxda iyo xangulaha qoor-gooyaha (meningitis), iyo dhiiga (meningococcimia ama sepsis). Wax ka yar hal 100,000 ee qof ee Maraykanka ku nool ayaa xanuunka qaada sanad kasta.

Q. Waa maxay halisaha cudurka meningococcal?

A. Cudurku wuxuu noqon karaa mid dilaa ah haddii aan si degdeg ah loo daaweynin. Dhaawac maskaxda soo gaara, maqalka oo luma, gacan/ lug la beelo iyo kelyaha oo hawlgaba ayaa ah halisaha kale.

Q. Waa maxay calaamaddaha iyo astaamaha lagu garto cudurka meningococcal?

A. Calaamadaha cudurku wuxuu la mid yahay jirooyinka kale waxayna noqon kartaa mid adag in la ogaado. Aqoonsiga iyo daawaynta hore waxay ka hortagi kartaa naafanimo halis ah iyo xataa dhimasho. Astaamaha waxaa ka mid ah:

- Xumad
- Madax xanuun iyo qoor adayg
- Lalabo
- Matag
- Iftiinka oo loo nuglaado
- Jahwareer
- Daal
- Qarqaryo la jaraynayo
- Neefshasho degdeg ah
- Garaac iyo xanuuno aad u daran oo soo gaara muruqyada, isgoysyada jirka, laabta ama caloosha

Q. Goorma ayay tahay in xubinta bulshada ee ka tirsan ee dhismaha kulliyadu uu daryeel raadsado?

A. Xubnaha bulshada ee kulliyada ka tirsan ee isku arka xumad uu la socdo madax xanuun aad u daran, qoorta oo adkaata, finan ama jahwareer waa in ay raadsadaan daryeel caafimaad. Raadso daryeel degdeg ah haddii isbedeladu ay yihiin kuwo aan caadi ahayn oo lama filaan ah ama yihiin kuwo daran.

Q. Sibee buu cudurka meningococcal u faafaa?

A. Cudurka waxaa la faafiyaa marka qof aan qabin xanuunku uu u soo dhawaado/taabto dareeraha sanka iyo cunaha qof qaba xanuunka. Isku soo dhawaanshuhu/is-taabashadu waxay dhacdaa marka:

- La wadaago koobabka, qasacadaha beer-ka ama soodhaha, ama weelasha kale ee wax lagu cabo
- La wadaago qalabka sigaarka lagu cabo (tusaale, sigaarka, sigaarka duuban ee marijuana, sigaarka elektarooniga ah 'e-cigarettes')
- La wadaago qaadada/fargeetada ama suxuunta
- Dhunkashada
- Qufaca iyo hindhisada aanan la daboolin

Dadka qaar ayaa *N. meningitidis* ku sida sankooda iyo cunahooda laakiin aan lahayn wax calaamad ah oo jiro. Waxaa laa tixgeliyaa in ay yihiin xanuun sidayaal.

Q. Yaa halista u badan ugu sugan cudurka meningococcal marka la eego dhismayaasha kulliyada?

A. Qof kasta ayaa qaadi kara cudurka meningococcal. Si kastaba ha ahaatee, ardayda kulliyada sanadka hore dhiganaysa ee ku nool guryaha kullliyada ayaa halis aad ah ugu sugan qaadida cudurka meningococcal marka loo eego ardayda kale ee kulliyada.

Q. Waa maxay sababta ardayga kulliyada sanadka hore dhiganayaa ee ku nool gurhaya kulliyadu uu halis aad ah ugu sugan yahay qaadida cudurka meningococcal marka loo eego ardayda kale ee kulliyada?

A. Habka difaaca jirka ee ardayda kulliyada sanadka hore dhiganaysa waxaa laga yaabaa in aanu aqoonsan bakteeriyada meningococcal isla markaana aanay ilaalin jirkooda haddii ayna ka ag dhawayn dad sida xanuunka ama ayna ahayn xanuun sidayaal. Ku noolaanshaha guryo isku dhow iyo dhinacyada kale ee la xiriira nolosha dhismaha kulliyada ayaa horseeda fursad la iskugu soo dhawaado/la isku taabto isla markaana ay qofka soo gaarto bakteeriyadu.

Q. Sidee baan cudurka meningococcal looga hortagi karaa?

A. Had iyo jeer samee nadaafadda gacanta ee wanaagsan. Iska ilaali isku soo dhawaanshaha/is-taabashada. Waxaad raacdaa tilmaamaha daryeel caafimaad bixiyaha ama mas'uulka caafimaadka haddii laguu sheego in aad qaadato daawada ka hortagga ka dib marka laga yaabo in xanuunku ku soo gaaro. Qaado tallaalka meningococcal.

Q. Tallaalada meningococcal miyaa la iskula talinayaa in la qaato ka hor intaan la imaan kulliyada?

A. Waxaa jira 13 kooxood oo kala duwan, sidoo kale loo yaqaan 'serogroups' oo ah *N. meningitidis.* Kooxaha A, B iyo C ayaa ah qiyaastii boqolkiiba 90 marka la eego dhacdooyinka cudurka meningococcal. Dhacdooyinka jiro ee ay sababaan W, X iyo Y way sii kordhayaan. Marka la joogo Oregon, tallaalka meningococcal ee lagula talinayo ardayda kulliyadu wuxuu daboolaa kooxaha A, C, W iyo Y. Kulliyadaha iyo jaamacadaha qaarkood ayaa u baahan tallaalkan. Qof kasta oo da'diisu tahay ugu yaraan 10 sano jir wuu qaadan karaa tallaalka MenB marka uu dhakhtar u qoro.

Iska ilaalinta kooxda B kuma jirto tallaalada caadiga ah. Kooxda B, ama MenB, tallaalku waxaa laga yaabaa in la iskula taliyo marka uu jiro Kooxda B cudurka meningococcal oo dillaaca.

Q. Mas'uuliyiinta caafimaadka dadweynaha ayaa ku taliyay MenB in la siiyo qaarka mid ah kulliyadayda, laakiin kulama talin kuwa kale. Waa maxay sababtu?

A. Marka uu cudurku dillaaco, mas'uuliyiinta caafimaadka ayaa laga yaaba in ay soo jeediyaan talooyin gaar ah oo ku aadan cudurka dillaacay oo ay ka mid yihiin bulshada ka tirsan dhismaha kulliyada ee ay tahay in la tallaalo, nooca tallaalka la isticmaalayo, iyo in la qaado shuruudaha looga baahan yahay daawada la isku qoro ee kooxaha qaarkood ee halista ugu sugan cudurka.

Go'aankani wuxuu ku salaysan yahay dhowr arrimood, laakiin arrimaha ugu waaweyni waa:

- **Waxa aynu ka ognahay cida halista ku sugan.** Waan ognahay qaar ka mid ah kooxaha (ardayda sanadka hore dhiganaysa ee ku nool guryaha kulliyada, kuwa qaba xaaladdo caafimaad oo gaar ah) ee halista aadka ah ugu sugan in ay la jiradaan MenB. Xaaladaha qaarkood, kaliya dadka halista u sareysa ugu sugan cudurka dillaaca ayaa u baahan tallaal.
- **Xaaladaha dillaaca cudurku uu saameyn ku yeelan karo cida ay tahay in la tallaalo iyo marka ay tahay in la tallaalo waxaa ka mid ah kuwa soo socda:** Goobta uu cudurku ka dillaacay, dadka ama kooxda ay u badan tahay in ay taabtaan dad qaba xanuunka, wakhtiga iyo suurta galnimida in dadkaasi h qiyaaso 'doses' kala duwan oo tallaal ah. Tusaalooyin gaar ahi waa:
  - In dadka xanuunka qabaa intii lagu guda jiray dillaaca cudurka ay ku noolaayeen guryo isku dhow sida guryaha kulliyada iyo in kale
  - In ay ka tirsan yihiin urrurada ka jira dhismaha kulliyada kuwaasi oo iyaga ka dhigay in ay aad iskugu soo dhawaadaan/is-taabtaan dadka kale iyo
  - Qiyaasta kooxahooda bulsho

Waxyaalahani ayaa muujiya cida laga yaabo in uu xanuunku soo gaaray, inta qof ee uu soo gaaray iyo cida halista ugu sugan soo gaarista xanuunka ee mustaqbalka.

- **Imisa qiyaasood 'doses' ayay shirkadaha daawooyinka soo saara iyo hawlgalayaasha kale ee caafimaadku bixin karaan.** Qaar ka mid ah tallaalada ayaa si baahsan loo helaa; iyadoo kuwo kale aan sidaa loo helin. MenB waa mid aad u yar sidaa darteed tallaal yar ayaa la soo saaraa marka loo eego noocyada kale cudurka meningococcal. Mas'uuliyiinta caafimaadka ee degaanka iyo gobolka ayaa laga yaabaa in ay xaddidaan ku talinta ah in la qaato haddii sahayda tallaalku aanay ahayn mid ku filan. Marka uu cudurku dillaaco, mas'uuliyiinta caafimaadku waxay xiriir la yeeshaan shirkadaha daawooyinka soo saara, isbitaalada iyo gobolada kale si loo buuxiyo baahida cudurka dillaacay.

Oregon Health Authority

WAAXDA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA
Ka hortagga Cudurada Daran ee la isku Gudbiyo
971-673-1111

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. La xiriir Ka hortagga Cudurada Daran ee la isku Gudbiyo 971-673-1111 ama email u dir ohd.acdp@state.or.us. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.